

Iyadoo loo marayo maalgelinta CARES ee federaalka, Degmada Nicollet waxay leedahay lacag loo heli karo si looga caawiyo kharashyada la xiriira daryeelka carruurta, guryaha, yutiilitida, iyo baahiyaha kale ee dhibaatooyinka la xiriira COVID-19.

Maalgelinta Daryeelka Carruurta

- Maalgelintu waxaa loo heli karaa dadka degan Degmada Nicollet kuwaas oo dhib kala kulmaya bixinta daryeelka carruurta sababo la xiriira COVID-19
- Barnaamijku wuxuu dhammaanayaa Nofeembar 15, 2020
- Ma jiraan xaddidyo dakhli ee ku aadan barnaamijkan
- Ka hel macluumaad dheeraad ah ama ka buuxi codsi halkan <https://www.co.nicollet.mn.us/800/Nicollet-County-CARES>
- Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan kala xiriir Liz Johnson 507.934.7168 ama emailka HHSCARESAct@co.nicollet.mn.us



Barnaamijka Maalgelinta Dhibaataada

- Maalgelinta waxaa loo heli karaa dadka degan Degmada Nicollet kuwaas oo dhibaato kala kulmaya bixinta kirada, yutiilitida, dayactirka gawaarida, iyo / ama kharashka aaska ee laxiriira luminta dakhliga sababo si toos ah ulaxiriira COVID-19
- Codsadayaasha looma baahna inay haystaan ogeysiiska guri-kasaarida
- Codsadeyaashu waa inay sidoo kale buuxiyaan codsigeena gargaarka degdegga ah Haddii codsade loo diido kaalmada degdegga ah, weli way u qalmi karaan barnaamijkayaga maalgelinta dhibaatooyinka
- Codsadeyaashu waa inay lahaadaan dakhli ka hooseeya 275% tilmaamaha saboolnimada ee federaalka
- Barnaamijku wuxuu dhammaanayaa Nofeembar 15, 2020
- Ka hel macluumaad dheeraad ah ama ka buuxi codsi halkan <https://www.co.nicollet.mn.us/800/Nicollet-County-CARES>
- Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan kala xiriir Liza Johnson 507.934.7168 ama emailka HHSCARESAct@co.nicollet.mn.us

